

Waalidiinta iyo Ilaaliyayaasha DPS,

Waxaa sharaf noo ah in aan ku dhawaaqno in Dugsiyada Dadweynaha Denver ay iminka u diyaarisay macalimiinta, shaqaalaha, iyo ardayda awoodda *Google Applications for Education* (Brograamyada Waxbarashada Google). Tan waxay fasalada ku kaalmeysaa qalabka iskaashiga (Google Docs), isgaarsiinta (Gmail), iyo keydinta faylka (Google Drive). Laga bilaabo sannad dugsiyeedka 2013-2014, dhamaan ardayda waxaa loo furi doonaa Xisaabta Ardayga Google haddii adiga aadan dooranin in aad ka saarid ardaygaada.

Maxaa Loola Jeedaa Tan

Tan macnaheeda waa in dugsiyada ay fursad u heli doonaan isticmaalka Google Apps xagga shaqada fasalka iyo isgaarsiinta. Dagmada waxay ardayda u furi doontaa xisaabaadka Google oo sugan. Marka dugsiya diyaar u noqdo in uu bilaabo isticmaalka xisaabaadkaan, waxaa la ogeysiin doonaa waalidiinta, waxaana ardayda la tababari doonaa sida loo isticmaalo Google Apps.

Goormaa Ayay Tani Dhici Doontaa?


Shaqaalaha dagamada waxay shaqeyn doonaan kuleylaha 2013 si ay siistemkaan u geliyaan. Dugsiyada waxay geli doonaan xisaabaadka marka uu bilowdo sannad dugsiyeedka, wuxayna ogeysiin doonaan waalidiinta marka ay bilaabaan isticmaalka adeegga.

Maxaa Looqa Baahan Yahay Waalidiinta in ay Oqadaan?

In ay la socdaan si ay u helaan macluumaadka dugsiya ardaygooda. Inta taasi socoto, waxaad halkaan ka baran kartaa in badan oo ku saabsan qiimaha Google Apps u leeyahay Waxbarashada: <http://tinyurl.com/WhyGoogleDPS>. Si aad u heshid macluumaad badan iyo jawaabaha su'aalaha ku saabsan Google ee DPS, fiiri hoos.

Sidee Ayaan Uga Baxaa Adeegaan?

Haddii aadan rabin in ardaygaada uu isticmaalo Xisaabta Google ee loo furay, waad ka saari kartaa adiga oo calaameeya sanduuqa ku yaal qeybta *Ruqsadda Waalidka iyo Sii Deynta (Parent Permission and Release)* (ee caadi ahaan lagu magacaabo *Foomamka Ruqsadda Waalidka*) ee laga helo gudaha warqadaha diiwaan gelinta.



Su'aalaha Badanaa Leys Weydiyo iyo
Jawaabaha la siiyo Waalidiinta/Ilaaliyeyaasha

Su'aalaha Guud Xisaabta

Q1: Sidee ayay xisaabta DPS Google uga duwan tahay xisaabta Gmail?

A1: Adeegyada Google ee laga dabaqi karo waxbarashada oo keliya ayaa laga helaa DPS Google. Qaar ka mid ah qalabka laga heli karo xisaabta dadweynaha Google lagama heli karo DPS Google. Intaas waxaa dheer, in xisaabta DPS Google laga galo bog ka duwan oo aan ahayn kan lala isticmaalo xisaabta dadweynaha Google (Gmail).

Q2. Email ma u diri karaa cunugeyga aniga oo isticmaala cinwaanka emailka Xisaabta DPS Google?

A2. Haa

Q3. Cunugeyga email ma u diri karyaa xubnaha qoyska ama asxaabta aan lahayn xisaabta DPS Google?

A3. Haa

Q4. Waalidiinta ma heli karaan xisaabta DPS Google?

A4. Maya waqtigaan. Waxaad sameysan kartaa xisaabta Shaqsiga Google marka aad booqatid <https://accounts.google.com/SignUp>.

Q5. Ma fiirin karaa warqadaha Google ee cunugeyga?

A5. Haa Cunugaada wuxuu u baahan doonaa in uu kula qeybsado warqadaha hoos yimaada fursadda "Share" ama in uu warqadahaas ka dhigo kuwo uu arki karo "qofk kasta oo qaba meel lagala xariiro", gudaha fursadda "Share."

Q6. Ma jiraan waxyeelo haddii ardaygeyga uu si khalad ah u isticmaalo Xisaabtiiska ama Xisaabteeda Google?

A6. Haa. Xisaabta Ardayga Google waa wax axsaan ah, marka haddii loo gafo, waxaa dhici doonto in isticmaalkeeda lala noqdo.

Q7. Aniga waxaan isticmaalaa Google Chat marka aan joogo guriga. Maxay tahay sababta uu ardaygeyga u isticmaalin karin?

A7: Iminka Google Chat waa laga damiyay ardayda si aan u ogaano waxtarka iyo isticmaalka habboon uu qalabka u leeyahay dagmada oo idil.

Su'aalaha Gelitaanka Dibadda Dugsiga

Q8. Cunugeyga awood ma u yeelan doonaa in uu isticmaalo Xisaabtiisa DPS Google marka uu ku sugan yahay dibadda dugsiga?

A8: Haa, marka uu adeegsado Windows, Mac, ama kombuyutarka Chromebook iyo browser la aqoonsan yahay iyo internet la geli karo.

Q9. Cunugeyga awood ma u leeyahay in xisaabtiisa DPS Google uu ka galo telefoonkiisa gacanta (smartphone)?

A9. Haa, wuu u shaqeyn doonaa, hase ahatee waqtigaan dagmada ma bixiso qoraal ama kaalmo.

Q10. Aniga guriga kuma qabo internet. Maxay yaahin ilaha uu heli karo ardaygeyga?

A10: Nasiib darro, DPS Google Domain waxaa la isticmaali karaa oo keliya marka la galo internetka. Cunugaada awood uma yeelan doono in uu xisaabtiiska DPS kala xariiro gurigaada haddii aadan lahayn internet. Meelaha dadweynaha sida maktabyada iyo makhaayadaha qaar waxaa laga helaa internet lacag la'aan ah oo ardayda u ogolaada in ay galaan. Waxaa kaloo internet jaban laga heli karaa Comcast. Si aad u heshid macluumaad badan, fadlan booqo <http://www.internetessentials.com>.

Q11. Ardaygeyga wuxuu dhibaato ku qabaa Xisaabtiiska DPS Google saacadaha dugsiga kaddib, yey la xariiri karaan?

A11. Nasiib darro, DPS ma siin karto ardayda kaalmo saacadaha dambe. Isaga ama iyada waxay u baahan tahay in ay sugto ilaa ay ku soo noqoto dugsiga si ay macalinka ugu sheegto dhibatooyinka ay la kulantay. Kaddib, macalinka wuxuu arrimahaan u gudbin doonaa wakiilka farsamada dugsiga kaasoo wax ka qaban doono dhibaataada.

Su'aalaha Ka Bixidda Xisaabta DPS Google

Q12: Sidee ayaan ardaygeyga uga saaraa adeegaan?

A12: Haddii aadan rabin in ardaygaada uu adeegsado Xisaabta looga furay DPS Google, fadlan buuxi qeybta ku jirata warqadaha diiwaan gelinta cunugga ee ku saabsan Ka-Bixidda xisaabta emailka ardayga ama weydii xogeynta dugsigaada.

Q13: Aniga waan ka joojiyay ardaygeyga in uu galo internetka dugsiga. Awood ma u yeelan doonaa ardaygeyga in uu weli galo Xisaabta DPS Google?

A13: Nasiib darro, bacdamaa DPS Google la geli karo oo keliya marka la adeegsado internetka, cunugaada awood uma yeelan doono in uu ka qeybgalo isticmaalka DPS Gmail, warqadaha Google ama qalab kale ee Google ee aan bixino dagmo ahaan.

Q14: Aniga waxaan ardaygeyga ka joojiyay in uu galo Google Apps. Awood ma u leeyahay ardaygeyga weli in uu sameeyo dhamaan shaqada loo diro?

A14: DPS waxay ballan ku qaaday in ay dhamaan ardayda siiso waxbarasho siman. Inkastoo Google Apps for Education ay ardayda iyo macalimiinta siiso qalabka isgaarsiinta, wada shaqeynta, iyo horumariso ka-qeybqaadashada ardayga, macalimiinta waxaa lagu dhiiri gelinaa in ay qorshe kale ku diyaariyaan daruusta Google Apps lana siiyo ardayda waalidiintooda dooratay in ay ilahaan ka joojiyaan caruurtooda ama ardaydooda qabta itaal darrida ka hor istaagta isticmaalka Google Apps.

Su'aalaha Ammaanka

Q15: Waxaan fahamsanahay in faltar ku jiro emailka Xisaabta DPS Google ee ardaygeyga xagga waxyaabaha aan habbooneyn sida erayada, sawirada, iwm. Ma shaqeyn doonaa filtarka emailka marka ardaygeyga diro/helo email haddii uu galo emailada dibadda dugsiga?

A15: Haa, Siistemka La Socoshada Aadanaha ee Gaggle.net. (<http://tinyurl.com/GaggleHMS>) wuxuu faltar ku sameyaa dhamaan emailada soo dhaca iyo ka baxa Google DPS si loo habsado habboonaanta dhamaan qoraalka, sawirada, iyo alaabta.

Q16: Faltar ayaa lagu sameyn doonaa DPS Gmailka ardaygeyga, waana lala socon doonaa si loo habsado in aysan soo gaarin waxyaabo gaf ah. Tan ma waxay ku dhici doontaa Google Apps

oo kale?

A16: Maya. Waqtigaan, faltar looma heli karo apps marka laga reebo Gmail. Macalimiinta waxay mas'uul ka yahiin la socoshada waxa ku jira, waxaana isku haleyn doonaa ardayda si ay u bartaan waddaniyadda dijitalka wanaagsan iyaga oo isticmaala qalabkaan.

Q17: Cungeyga ma arki doonyaa xayaysiin marka uu galo Xisaabta DPS Google?

A17: Maya, haddiba ardayga uu galo Xisaabta DPS Google, ma arki doono xayaysiin gudaha DPS Google.

Q18: Maxay yahiin talaabadaha la qaadi karo si looga hortago gardarada internetka?

A18: DPS waxay adeegsataa barnaamijka waddaniyadda dijitalka ee ka hadasha ammaanka gardarada internetka ardayga via Common Servse Media. Brian Dino (brian_dino@dpsk12.org) waa wakiilka DPS Common Sense Media, waana la heli karaa si uu ulaa hadlo waalidiinta, iyo ardayda xagga waxa laga helo barnaamijka iyo sida loo dhowro ammaanka ilmaha.

Q19: Ardaygeyga ma adeegsan karyaa xisaaba DPS Google si u sameeyo/sameeyso Bogga Google?

A19: Maya. Macalimiinta waxay samayn karaan bogag, waxayna kantarooli karaan haddii ardayda loo ogol yahay in ay samayaan iyo/ama wax ka baddalaan bogagga ku yaal bogga internetka. Macalainka wuxuu kaloo kantarooli karaa haddii dadweynaha ay arki karaan bogga.

Q20. Ma jirta halis in emailka uu ardaygeyga ka helo DPS Gmail marka uu joogo guriga laga helo firus waxyeelo gaarsiin kara kombuyutarkena guriga?

A20: Mar kasta waxaa jira halis in firus iyo "malware" kale ay waxyeelo gaarsiyaan kombuyutarkaada guriga. Hase ahatee, tan waxay u baahan tahay in ardaygaada uu riixo meelaha lagala xariiro waxyaabaha xun. Ardayda waa in ay bartaan dhaqanka ammaanka kombuyutarka si ay isaga ilaaliyaan waxyaabaha noocaas.

Su'aalaha Dheeraadka ah

Q21: Waxaan qabaa su'aalo kale, yaan la xariiraa?

A21: Macalinka ardaygaada waa in uu awood u leeyahay in uu ka jawaabo inta badan su'aalahaada iyo kuwa aysan awood u lahayn in ay ka jawaabaan waxaa loo diri doonaa ilo ka jawaabi kara.

Q22. Maxaa dhaca haddii cunugeyga uu leeyahay xisaab Gmail oo shakhsi ah. Ma isticmaali karaan xisaabtaan baddalkii xisaabta DPS Gmail?

A22: Maya. Ardayda waxay Warqadahooda Google Drive la qeybsan karaan Xisaabta DPS Google, hase ahatee waxay u baahan yahiin in ay isticmaalaan xisaabaadkooda DPS Gmail si ay is buuxda uga fa'iideystaan DPS Apps for Education.